

Bent Høie oo guddigi khubarada ahaa ka guddoomay warbixinti tallaallada

Wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Bent Høie ayaa maanta oo isniin 10-ka maajo ah guddigi khubarada ahaa ka guddoomay warbixinti tallaallada ku salaysan fayrus kale oo la beddelay (fayras-faktarka) iyo isticmaalkooda Norway. Waxay warbixintu ku talinaysaa in tallaallada AstraZeneca iyo Janssen aan lagu darin barnaamijka tallaalka koroonaha ee norwijiiga. Wuxuu guddigu ka taliyay in ay tallaalka ciddii doonaysa qaadato asaga oo aan qayb ka ahayn barnaamijka tallaalka, laakiin guddigu wuu ku kala qaybsan yahay shuruudaha lagu xirayo qaadashada caynkaas ah.

– Shaqo ballaaran oo wanaagsan ayuu guddigu muddo gaaban ku qabtay. Dawladda ayaa hadda si buuxda u eegi doonta warbixinta, ayada iyo taladii Machadka caafimaadka dadweynaha ayaana lagu salayn doonaa go'aan-ka-gaarista isticmaalka tallaalladan, ayuu yiri Høie markii uu warbixinta guddoomayay.

Guddiga khubarada ah, oo uu madax ka ahaa Lars Vorland, wuxuu qiimayn guud ku sameeyay halista isticmaalka tallaallada fayras-faktarku u leeyihii qofka gaarka ah iyo midda bulsho labadaba. Xubnaha guddigu waxay isugu jireen qaar dalka iyo dibedda ka yimid, oo waxay sidoo kale eegeen maclumaaadka heer adduun laga hayo ee waxyeellada danbe ee tallaalka iyo halistiisa.

Dib-u-furista bulshada ayuu tallaalku muhiim u yahay

In dadweynaha la tallaalo aya muhiim u ah sidii bulshada Norway dib loogu furi lahaa.

Isticmaalka tallaalka AstraZeneca waxaa si ku-meelgaar ah loo hakiyay 11-kii bishii maarso ee sanadkaan, kaddib markii la arkay waxyeello dhif ah laakiin aad halis u ah. Machadka caafimaadka dadweynaha aya bishii abriil ku taliyay in tallaalkan laga saaro barnaamijka tallaalka sababtoo ah khatarta loogu jiro waxyeellada dhifka ah laakiin aadka halista u ah. FHI aya sidaas ku taliyay asaga oo u eegaya xaaladda Norway ee ah in uu cudurku ku yar yahay.

Dawladdu waxay doonaysay qiimayn intaas ka ballaaran oo ay qayb ka tahay khibradda ay dalalka kale tallaalladan u leeyihii, iyo dhibka dadweynaha iyo guud ahaan bulshada uga imaan kara dib-u-dhigista tallaalka. Waxaa sidaas darteed la qabtay guddi khuburo ah kuwaas oo eegay waxa ka imaan kara haddii Norway laga isticmaalo ama aan laga isticmaalin tallaallada fayras-faktarka ee AstraZeneca iyo Janssen.

– Muddadii u danbaysay waxaa soo baxay warar tallaal oo badan oo fiican. Wuxaan helaynaa tallaal badan oo Pfizer-BioNTech ah, daraasaadkuna waxay sheegayaan in difaac aad u fiican la helayo durba marka saddex toddobaad ka soo wareegto tallaalka koowaad. Taas darteed ayaan u kala fogeynay muddada u dhexaysa tallaalka koowaad iyo midka labaad, si ay dad badan tallaalka xilli hore u helaan. Waxyaalahan aya marka ay is biirsadaan keenaya in ay yaraanayso dhibaatada ka imaanaysa in aan la isticmaalin tallaallada fayras-faktarka, ayuu yiri Høie.

Talooyinka guddiga khuburada ah

Guddiga khuburada ah wuxuu sameeyay qiimayn xag habboonaanta tallaabooyinka ka hortagga cudurka iyo mid xag sharci ah, falanqayn dhagaalaha bulshada iyo cawaaqibka caafimaad iyo kan bulsho ee ka imaan kara. Guddigu wuxuu caddeeyay in tallaallada fayras-faktarku ay guud ahaan yihii tallaallo wax ka tara covid-19. Soo jeedinta ah in aan lagu darin barnaamijka tallaalkuna waa mid salka ku haya faafidda cudurka ee Norway.

– Waxay warbixintu qoraysaa haddii faafidda cudurku is-beddesho, ama noocyoo fayras ah oo cusub soo baxaan, dhibaatooyin aan la filayn ay ku yimaadaan keenista tallaallada kale ama la helo warbixin cusub oo ku saabsan waxyeellada tallaalladan in ay keeni karaan in wax laga beddelo go'aanka guddiga.

Guddigu wuxuu qabaa in aysan weli suurtaggal ahayn in la caddeeyo dadka kuwooda khatarta badan ugu jira in ay la kulmaan waxyeello halis ah sida dhiig-xinjirowga iyo xinjir-keenayaasha dhiiga oo hoos u dhaca, tallaalka ka hor iyo kaddib midna. Taas darteed ayaan guddigu u tilmaami karin dad la siin karo tallaallada fayras-faktarka ayada oo lagu salaynayo da' ama jinsi. Sidoo kale maanta daaweyn waxtar leh looma hayo waxyeellada halista ah.

Qaadasho qofku xor u yahay

Guddigu wuu ku kala qaybsan yahay shuruudaha lagu xirayo in tallaalka la qaato asaga oo aan qayb ka ahayn barnaamijka tallaalka. Inta aqlabiyyadda leh waxay qabtaa in xaaladda faafidda cudurka ee Norway ay marar dhif ah oo keliya saamaxayso in tallaallada fayras-faktarka la bixiyo haddii qofku iskiis u doorto.

Guddiga inta tirada yar waxay qabtaa dadka doonaya in la siin karo warqad dhakhtareed oo ay ku qaataan tallaallada AstraZeneca iyo Janssen. Waxay culayska saarayaan in uu qofku yahay kan qiimaynta ugu fiican ku samayn kara halista waxyeellada, xaaladdiisa gaarka ah iyo baahida uu u qabo in tallaalku dhowr toddobaad u soo hor maro.

Halkan ka akhri hawshii guddiga loo igmaday iyo dadka ku jiray.

[Guddiga khuburada ah ee tallaallada fayras-faktarka - regjeringen.no](http://Guddiga%20khuburada%20ah%20ee%20tallaallada%20fayras-faktarka%20-%20regjeringen.no)